

Heshiis ku saabsan kombyuutarka ardayga

(kombyuutarka ardayga wuxuu noqon kara iPad, Chromebook ama PC)

Dhammaan ku isticmaalayasha shabaqada Dowladda hoose ee Växjö, waa in qalabyada warbaahinta casriga (IT) ee dugsiga ugu isticmaalaan qaab xilkasnimmu ku salaysan, iyadoo fiirogaar aan la siinin haddii qofku u adeegsanaayo kombyutar isaga u gaar ah iyo in kale. Nidaam-bulshodeedka waxaa u ah sharciyada dalka Iswiidan ka hirgalay iyo saldhigga anshaxa ee qorsheha waxbarshada. Taasoo macneehada ah in ixtiraam loo muujiyo wada-sinaanshada aadanaha oo idil, lagu isticmaalo af-wanaag iyo la tixgeliyo sharaf-shaqsiyeedka iyo sharafta dadyoowga kale. In qof meel looga dhaco waa arrin aan marna la aqbali karin.

Kombyuutarrada shabaqa ku xiran, marna laguma isticmaali karo qaab aan waafaqsanayn sharciyada dalka Iswiidan ka hirgalay, tusaale soo dejisada waxyaalaha ku xafidan copyright.

Kombyuutar-shaqsiyeedka

Kombyuutarka ardayga waa hantida dugsiga. Markii ardayga la siiyo mas'uuliyad-shaqsiyeedka kombyuutarka, waxaa heshiis kala saxiixday maamulka dugsiga, ardayga iyo xilhaayaha xannaanadda/waalidka. Macnaha heshiiska waxaa weeyaan, in ardayga iyo xilhaayaha xannaanadda/waalidka ay aqbalayaan nidaamyada iyo amar-bixinada u degsan kombyuutar-shaqsiyeedka. Waxaa mararka qaarkood dhacda in wargelin la'aan lagu dhaqaaqo kormeerid. Haddii qodobada nidaamyada aan la tixgelin, waxaa la ciribtiri doonaa heshiiska. Kaddib ardayga xaq u ma laha in uu isticmaalo kombyuutar-shaqsiyeedka.

Keydinta iyo caymiska

Kombyuutarrada waxay leeyihiin damaano iyo caymis, kuwaasoo hirgala markii u guriga iyo dugsiga ba yaallo. Caymiska wuxuu waxtarayaa haddii ay dhacaan waxyeello lama filaan ahaa ama xatooyo. Tan ku saabsan caymiska xatooyada wuxuu ka hirgala oo keliya dugsiga iyo guriga u ardayga degan yahay. Haseyeeshe, caymiska wuxuu hirgeli karaa haddii qalabka loo daryeelay qaab xilkasnimo ku salaysan, oona lagu keydsho meel sugan. Kombyuutarka waa shay aad loo xado, sidaas darteed waa in mar kasta isha lagu haya, sida tusaale xilliyada biririfta iyo xisadaha isboortiga.

Haddii kombyuutarka u waxyeelmo ama haddii u lummo, waa in sida ugu dhaqsida badan la wargeliya waaxda [IT-support] ee dugsiga ama qofka arrimaha mas'uul ka ah. Kaddib waxaa lagu dhaqaaqi doona qiimaynta waxyeelidda. Waxaa ku xiga go'aanka tallaabada laga qaadi lahaa. Haddii kombyuutarka uu lummo waa in ciidanka booliska la wargeliya – haddii lummada ay dhacdo saacadaha dugsiga dhigashada, waxaa wargelinta ciidanka booliska ku dhaqaaqi doono maamulka dugsiga. Saacadaha kale waa in wargelinta u ku dhaqaaqo xilhaayaha xannaanadda/waalidka ardayga. Haddii waxyeelidda u sababay ardayga, waxaa bixinta magdhowga waajib ku ah ardayga iyo/ama xilhaayaha xannaanadda/waalidka ee ardayga.

Xaqiijinta amaahsashada kombyuutarka ardayga

(kombyuutarka ardayga wuxuu noqon kara iPad, Chromebook ama PC)

Aniga/anaga waxaa lay/nala wargeliyay qodobada ku qoran qoraalka "Heshiiska kombyuutarka ardayga" waxaana fahmay/fahanay shuruudaha iyo nidaamyada u degsan. Kuwaasoo hirgeli doono markii ubadkayga la siiyo mas'uuliyadda ku isticmaalka kombyuutar-shaqsiyeedka, taasoo ujeedada tahay in waxbarasho awgeed u adeegsado.

Aniga/anaga waxaa lay/nala wargeliyay qodobada ku qoran "Nidaamyada iyo amar-bixinta u degsan ku isticmaalka shabaqada Dowladda hoose ee Växjö" Maadaama aan ahay qof arday ka ah dugsiyada ee maamusho Dowladda hoose ee Växjö, waxaan ballan qaadayaa in aan tixgeliyo nidaamyadaas. Waan ogsoon nahay in layga joojin doono ku isticmaalka, haddii aanan tixgelin qodobada nidaamyada. Waxaa layga ciribtiri kara xaq u yeelanshada kombyuutar-shaqsiyeedka. Taasoo xitaa macneheeda noqon doonto in la kormeero waxa ku qoran emailkayga iyo akawntiga ii gaarka ah.

Maadaama aan ahay xilhaayaha xannaanadda/waalidka waxaan ogsoon nahay, nidaamyada khuseeya ubadkayga. Kuwaasoo ku saabsan ku isticmaalka kombyuutarrada dugsiga iyo/ama la siiyo mas'uuliyadda ku isticmaalka kombyuutar shaqsiyeed waana aqbalay.

Waxaan ogsoon nahay hirgelinta qodobada qoraalkaan ku qoran, oo ah mudada ubadkayga u arday ka yahay dugsiga ama ilaa uu kombyuutarka dib ugu soo celiyo. Xilliyada waxbarashada la joojiyo waa in kombyuutarka dib loogu soo celiya dugsiga.

Ardayga waa in uu kombyuutarka, dab-siiyaha iwm dib u soo celiya markii mudada amaahsasha ay dhamaato. Goorta dib u soo celinta kombyuutarka waxaa la aqbali kara dugobida caadiga ah.

Nooca qalabka	
Summadda u gaarka ah	
Goobta iyo taariikhda	
Tobbanka lambar aqoonsiga ee ardayga	
Magaca ardayga	
Saxiixa ardayga	

Saxiixa xilhaayaha xannaanadda/waalidka	
Magaca saddexan ee xilhaayaha xannaanadda/waalidka	

Foomka oo saxiixan gacanta ka saar _____